**Jamhuuriyadda Soomaaliya**
*Xafiiska Madaxweynaha*

جمهورية الصومال
مكتب الرئيس

Somali Republic
*Office of the President*

---

**Xeer Madaxweyne Lr.** JS/XM/217/06/2012, Taariikh Juun 22, 2012
**Dhammeystirka Xilliga Kumeel gaarka dowladda Federaalka KGM**

MADAXWEYNAHA,

**Markuu garowsaday:** inay horumar la taabankaro ka sameeyeen saxiixayaashu sidii loo dhamaystirilahaa kumeelgaanimada, saxiixayaashaas oo ay ka mid yihiin Mudane Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka KMG ah Mudane Shariif Xasan Sheekh Aaden, Mudane Cabdiweli Maxamed Cali, Raii'sul Wasaaraha Dawladda KMG Soomaaliya; Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Maxamud (Farole), Madaxweynaha Dawladda Puntland; Mudane Maxamed Axmed Caalin, Madaxweynaha Galmudug; Mudane Maxamed Maxamuud Yuusuf Wakiilka Ahlu Sunnah Wal-Jama'a (ASWJ) iyo Wakiilka Xoghayaha Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (SRSG) Amb. Augustina Mahiga;

**Markuu ogaaday:** inay saxiixayaashu la sameeyeen la tashi ballaaran odayaal dhaqameedka si waafaqsan dhaqanka;

**Markuu arkay:** in Guddiga Dastuurka Federaalka kumeelgaarka (IFCC) ee lagu magacaabay Qodobka 11 (4) ee Axdiga Federaalka kumeelgaarka iyo Guddiga khubarada oo ay magacaabeen saxiixayaashu ay Guddi waliba soo dhamaystireen waajibaadkoodi oo ay soogaarsiiyeen saxiixayaasha Dastuurka Qabyo qaraal ah;

**Markuu tixgeliyey:** Xaaladda siyaasadeed ee dalku marayo, oo ay ugu horreyso inuu Baarlamaankii Federaalka KMG ahi uu awoodi karin, hadda sida uu yahay, inuu dib u eegid ku sameeyo Axdiga Federaalka kumeelgaarka ama soo saaro sharciyo kale si looga gudbo kumeelgaarnimada iyo in la dhamaystiro Dastuurka Qabyo Qoraalka ah; iyo

**Markuu gartay** baahida degdegga ah ee loo qabo in la dhammeystiro Qoraalka Dastuurka (waqtiga ay isku raaceen saxiixayaasha iyo bulshada caalamku, Soomaaliduna sugeysayso)

Wuxuu Xeeriyey oo uu soosaaray:

**Qodobka 1aad,**
**Dib u eegid Axdiga Federaalka kumeelgaarka**
**Qodobka 1aad-Dib u eegid Qodobka 11 ee Axdiga Federaalka KMG**

Qodobka 11aad ee Axdiga Federaalka KMG Soomaaliyeed dib-ueegid ayaa lagu sameeyey, waxaana loo bedelay, faqradaha (3)(b), sidan soo socota:

> "(3)(b) Habraaca ansixinta Dastuurka cusub wuxuu noqonayaa sida ku qoran Qodobka 11.2"

Qodobka 2aad-waxaa lagu daray Axdiga Federaalka KMG Qodobada 11.1, 11.2 iyo 11.3:

**Qodobka 11.1 Guddiga Farsamo ee Xulista**

Waxaa la aas-aasi doonaa Guddiga farsamo ee Xulista kaas oo dhigi doona islamarkaana faafin doonaa liiska odayaasha soo jireenka ah ee ah 135 duubabka kuwaas oo soo xuli doona xubnaha Golaha Ansxinta Dastuurka (National Constituent Assembly) ee Baarlamaanka ee cusub ee Federaalka si waafaqsan habraaca khuseeya

**Qodobka 11.2 Diyaargareynta ugu dambeysa ee Qabya-Qoraalka Dastuurka**

1. Saxiixayaasha Road-mapka waxay saxiixi doonaan qabya-qoraalka ugu dambeeya ee dastuurka 22ka Juun 2012.
2. Markaa kadib, saxiixayaashu waxay qabya-qoraalka u gudbin doonaan Guddiga Dastuurka Federaalka ee madaxa bannaan (IFCC) ugu dambeyn 25ka Juun 2012 si ay u sameeyaan barnaamijka baahinta qabya-qoraalka ilaa iyo 29ka Juun 2012.
3. Saxiixayaasha Road-mapka waxay soo gabagabeyn doonaan howsha Guddiga madaxa bannaan ee dastuurka Federaalka iyagoo u sameynaya xaflad lagu aqoonsanayo howshoodii qaran ee lixdii sano ee la soo dhaafay

**Qodobka 11.3 Golaha Ansixinaya Dastuurka**

1. Waxaa la dhisayaa Golaha Ansixinta Dastuurka oo ujeedadoodu tahay ka baaraan-degga iyo u codeynta Dastuurka Qabyada ah sida uu ku cad qodobka 11.2
2. Qabya-qooraalku wuxuu si kumeel gaar ah ansax u noqonayaa haddii ay u codeeyaan in ka badan 50% xubnaha Golaha ansixinta dastuurka
3. Sida uu qabo qodobka 71 aad (12) ee Axdiga KMg ah, marka uu Golaha Ansixintu uu ansixiyo Dastuurka Cusub:

   (a) Dastuurka Cusub ayaa si kumeel gaar ah loogu dhaqmayaa.
   (b) Waxaa meesha ka baxaya Axdigii KMG
4. Markuu golaha ansixintu ansixiyo, Dastuurka Cusub waxaa la horgeyndoonaa afti dadweyne halkaas oo uu ugu dambeyn ansax ku noqonayo marka uu helo 50% iyo dheeraad cododka aftida.
5. Golaha Ansixinta waa lakala dirayaa marka taariikhda la qabto codeynta iyadoo la eegeynin in dastuurka la ansixiyay iyo in kale.

**Qodobka 3. Wax-ka-Bedalidda Qodobka 71aad ee Axdigaa KMG ah**

Qodobka 71aad ee Axdiga ayaa wax laga bedalay iyadoo lagu badalayo faqradda (7), ee soo socota:

"(7) Axdiga ayaa saldhig u ah Dastuurka Federaalka ah ee qabya-qoraalkiisu socdo kaas oo loo gudbin doono Golaha Ansixinta iyadoo la raacayo Qodobka 11.2 iyo 11.3

**Qeybta 2aad**

**Go'aannada Saxiixayaasha Road-mapka**

**Qodobka 4 Meel-marinta Baratakoollada**

1. Marka ay Dikreetadan ay soo baxdo, saxiixayaashu:
   (a) Waxay saxiixayaan baratakoolka aas-aasaya Guddiga Farsmo ee Xulista(Technical Selection Committee), isagoo islamarkiiba howlgalaya
   (b) Waxay saxiixayaan baratakoolka aas-aasaya Golaha Ansixinta Dastuurka (National Constituent Assembly) , iyo guddiyada socodsiinta howlihiisa iyadoo loo sameynayo xeerar iyo hab-raac.
2. Waxay isugu yeerayaan Golaha Ansixinta Dastuurka marka ugu soo horreysa ee suura-gal ah
3. Baratakoollada iyo tillaabooyinka kale ee ay saxiixayaashu qaadeen waxay dhaqan-galinayaan mabaadiidii ay saxiixayaashu ku heshiiyeen Kampala, Garowe I and II Kalkacyo iyo Addis

**Shariif Sheekh Axmed**
**Madaxweynaha Dowladda Federaalka KMG**

*(fiiri lifaaqa bogga 4aad)*

**Qodobka 5aad Eray-Bixin & Dhaqan-gal**

1. Baratakoolladan:
   - (a) Weedha" Guddiga Dhexdhexaadinta Odoyaasha" waxaa loo wadaa guddiga ku magacaaban Baratakoolka aas-aasaya Guddiga Farsamo ee Xulista ee ay ansixiyeen saxiixayaasha Road-mapka 22ka juun
   - (b) (b) Weedha " Guddiga Farsamo ee Fududeynta ee xasiixayaasha" waxaa loo wadaa guddiga ku magacaaban Baratakoolka aas-aasaya Guddiga Farsamo ee Fududeynta ee ay ansixiyeen saxiixayaasha Road-mapka 22ka juun
   - (c) Weedha "Saxiixayaasha Road-mapka"waxaa loo jeedaa masuuuliyiinta haya Xafiisyadan soo socda oo wada jira:
     - a) Maadaxweynaha Dowladda Federaalka KMG
     - b) Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka KMG
     - c) Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Federaalka KMG
     - d) Madaxweynaha Puntlan
     - e) Madaxweynaha Galmudug
     - f) Wakiilka Ahlusunna Waljamaaca
     - g) Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay
   - (c) (d) Weedha "Guddiga Farsamo ee Xuista" waxaa loo wadaa guddiga ku magacaaban Baratakoolka aas-aasaya Guddiga Farsamo ee Xulista ee ay ansixiyeen saxiixayaasha Road-mapka 22ka juun

2. Baratakoolkan waa in loo tarjumaa loona dhaqangaliyaa si waafaqsan oo dhaqangalsan heshiisyadii ay gaareen saxiixayaasha Road-mapka ee Kampala, Garowe I, II , Galkacyo iyo Addis Ababa iyo dikreetada Madaxweyanaha ee 22ka Juun
3. Wixii muran ah oo ku saabsan eraybixinta iyo isticmaalka baratakoolkan waxaa loo soo celinayaa saxiixayaasha Road-mapka wixii go'aan iyo tilmaan ah.
4. Wixii six un uturjun ah ama aan caddeyn eek u saabsan dikreetadan ama baratakoollada kale ee la xiriira waxaa go'aankeeda lejh qeybta af-ingiiska ee dukumentiyada.
5. Qaramada Midoobay oo ah urur dhexdhexaad ah oo ay ka go'an tahay arrinka Road-mapka, waxaa laga codsanayaa in uu dusha ka ilaaliyo oo uu bixiyo gacansiinta loo baahan yahay ee la xiriirta shaqada Baarlamaanka cusub ee Soomaaliya iyadoo la socota guusha dhammeystirka xilliga kumeelgaarka ah oo ay ku jirto dibueegiddii iyo ansixintii dastuurka kumeel gaarka ah.